# TABABARKA
# HUBINTA BOOQASHADA ELEKTAROONIGA AH
(EVV)

EE LOOGU TALAGALAY

# SHAQAALAHA TAAGEERADA SHAKHSIYEED EE DD (PSW)

eXPRS
Express Payment & Reporting System

ODDS eXPRS EVV

*Gu'aga/Xagaaga 2019*

# Waa maxay "EVV"?

Xaqiijinta Booqashada Elektarooniga ah – ama EVV waa qayb ka mid ah sharciga federaalka oo loo yaqaan xeerka *21st Century Cures Act*.

EVV wuxuu

- *caddeyn sax ah oo waqtigeedu dhab yahay uga baahan yahay dhammaan adeegyada Shaqaalaha Daryeelka ee Medicaid dhaqaalihiisa bixiso*
- *ee ku lugta leh booqashada guriga ee daryeel bixiye sameeyo*
- *waqtiga uu adeegyada helo qofku*

# Waa maxay macluumaadka ay EVV lasocoto?

Xeerka *21st Century Cures Act* ayaa tilmaamaya in nidaamyada EVV ay qabtaan macluumaadka soo socda *waqtiga adeegyadu dhacayaan*:

- ✓ *QOFKA helaya adeega*
- ✓ *NOOCA adeega la bixiyay*
- ✓ *TAARIIKHDA adeega la helay*
- ✓ *WAQTIGA adeegu Bilaabmo isla markaana Dhammaado*
- ✓ *BIXIYAHA adeega*
- ✓ *GOOBTA adeega*

eXPRS ayaa lagu sameeyay cusbooneysiin si ay qabato dhammaan macluumaadkan.

# Waa maxay adeegyada ka mid ah EVV?

EVV ayaa looga baahan yahay *DHAMMAAN* adeegyada Shaqaalaha Daryeelka ee uu helay qofku, sida:

- ✓ *OR526 – Shaqaalaha Daryeelka*
- ✓ *OR526/ZE – Shaqaalaha Daryeelka 2:1 shaqaalaha*
- ✓ *OR507 – Daryeelka Gargaarka Maalin kasta*
- ✓ *OR502 – Qorshaha Gobolka ee Daryeelka Shakhsi ahaaneed*

EVV *loogama baahna* adeegyada kale ee PSW, sida:

- ⊗ *OR004 – Masaafada Gaadiidka*
- ⊗ *OR401 – Taageerada Shaqaaleynta ee Tababarka Shaqada*

# Muxuu yahay waxa isbeddelaya ee loogu talagalay PSW ee la xiriira EVV?

Waxaa jiri kara qaar ka mid ah ereyo cusub oo PSW ay u baahan doonaan in ay ogaadaan:

- **eXPRS Desktop** = website-ka caadiga ah ee eXPRS
- **eXPRS Mobile-EVV** = eXPRS marka la isticmaalo iyada oo la adeegsanayo qalabka gacanta 'mobile device'.
  - *eXPRS Mobile-EVV ma aha nidaamka 'app' ee aad ka soo dejiso/min-guuriso qalabkaaga gacanta.*
- **Adeegyada La Bixiyay** ama **SD** = macluumaadka biilka xaashida shaqada "timesheet" ee la geliyay eXPRS ee loogu talagalay taariikhaha/waqtiga uu shaqeeyay PSW.
- **Hay'adda Maamulida Kiiska** ama **CME** = oo ah eray loo isticmaalo sharaxaadda CDDP, Ganacsiga ama Barnaamijka CIIS; dhammaantood kuwani waa Hay'adaha Maamulka Kiiska (**CME**s).

# Muxuu yahay waxa isbeddelaya ee loogu talagalay PSW ee la xiriira EVV?

Waxaa jiri doona isbeddelada qaarkood oo ah sida PWS u diro biilka waqtigiisa uu la shaqeeyay EVV, kaasi oo biilka ka dhigi doona mid sahlan.

- PSW waxay isticmaali doonaan qalabka gacanta 'mobile device' *(telefoonka casriga ah 'smartphone' iyo tablet-ka)* si ay u galaan waqtiga ay shaqeeyeen *xilliga* ay Bilaabaan & Dhammeeyaan shaqada ay u hayaan qof kasta & waqtiga shaqada.
- eXPRS Mobile-EVV waxay samayn doontaa & keydin 'save' doontaa *qoraalka* biilasha SD ee la geliyo ee loogu talagalay PSW iyada oo si toos ah & dhaqso ah loogu keydinayo eXPRS.
  - *PSW uma baahnaan doono gacan ahaan u geliyo 'manually' waqtiga uu shaqeeyay ee loogu talagalay adeegyada Shaqaalaha Daryeelka ee la gelinayo eXPRS ee waqtiga mushaharka.*

# Muxuu yahay waxa *AAN* isbeddelayn ee loogu talagalay PSW ee la xiriira EVV?

Xataa marka la adeegsanayo EVV, waxyaabo badan ayaa sidoodii hore u ahaan doona PSW.

- PSW waxay weli isticmaali doonaan eXPRS Desktop *(website-ka caadiga ah)* si ay sameeyaan/gudbiyaan biilashadooda SD ee loogu talagalay adeegyada aan ahayn EVV *(Masaafada La Socdo & Tababarka Shaqada).*
- eXPRS Mobile-EVV waxaa loo isticmaali doonaa adeegyada la bixiyay/waqtiga la shaqeeyay ee loogu talagalay DHAMMAAN PSW laga bilaabo *Luulyo 16-keeda & wixii intaasi ka dambeeya*.
  - *Biilasha loogu talagalay waqtiga la shaqeeyay **ka hor Luulyo 16-keeda**, waxaa habkii hore loo gelin doonaa **eXPRS Desktop** (website-ka caadiga ah).*

# Muxuu yahay waxa *AAN* isbeddelayn ee loogu talagalay PSW ee la xiriira EVV?

- PSW waxay isticmaali doonaan eXPRS Desktop *(website-ka caadiga ah)* si ay gudbiyaan ***DHAMMAAN*** biilashadooda SD & daabacaan xaashiyaha shaqada si loo saxiixo.
  - ✓ *Gudbinta biilka SD & nidaamka xaashida shaqadu sidoodii hore ayay ahaanayaan*.
  - ✓ *PSW waa in ay xaashiyaha shaqada weli u daabacaan cidda aad u shaqeyso si uu u fiiriyo isla markaana u saxiixo*
  - ✓ *PSW waa in ay xaashiyahan shaqada oo saxiixan u keenaan* ***CME***wax oggolaanaya
- PSW waxay sii wadi doonaan in ay jeegagooda/lacag dhigashadooda tooska ah ka helaan shirkadda mushaharka ee FMAS – Iskaashiga Dadweynaha, LLC (PPL)

# Waxyaabo muhiim ah oo ay tahay in laga ogaado EVV

- Adeegyada goobta waa in la dhigaa mid DAARAN/FURAN oo loogu talagalay:
  - ✓ *qalabka gacanta 'mobile device' ee aad isticmaalayso, IYO*
  - ✓ *nidaamka internet-ka laga gelo 'internet browser app' (Chrome, Safari, Firefox, iwm.) ee aad isticmaalayso si aad u gaarto eXPRS*

- eXPRS Mobile-EVV wuxuu KALIYA tusi/muujin doonaa oggolaanahsha PSW ee loogu talagalay adeegyada & dadkaee *shaqeynaya* isla taariikhda aad timaado shaqada*.
  - ➡ **Shaqeynaya macnaheedu waa:*
    - ✓ CME ayaa oggolaanshaha geliyay/dhigay website-ka eXPRS dhexdiisa,
    - ✓ waxaa *aqbalay* nidaamka *wuxuuna* diyaar u yahay in PSW uu shaqeeyo & biilka diro

# Waxyaabo muhiim ah oo ay tahay in laga ogaado EVV

## TALOOYIN WAXTAR LEH:

- *KA HOR inta aadan imaan shaqada* gal eXPRS Desktop & xaqiiji in aad haysato oggolaansho shaqeynaya oo loogu talagalay adeegyada & dadka laguu qorsheeyay in aad u shaqeyso.
  - ⇨ *HABKA UGU FIICAN EE WAX LOO QABTO - fiiri in oggolaanshahaagu yahay mid shaqeynaya dhowr maalmood ka hor inta aan laguu qorsheyn in aad shaqeyso, si aad u haysato waqti lagu xalliyo arrimaha dhanka oggolaanshaha ka hor inta aanu waqtigaaga shaqadu bilaabmin.*

# Waxyaabo muhiim ah oo ay tahay in laga ogaado EVV

- Fiiri oggolaanshahaaga shaqeynaya adiga oo ka helaya bogga biilka SD ee ku jira *eXPRS Desktop* *(website-ka caadiga ah ee eXPRS).*
- Xaqiiji Taariikhaha Bilawga & Dhammaadka loogu talagalay adeega, iyada oo kuwani yihiin taariikhaha laguu oggolaaday in aad u shaqeyso qofkaasi/adeegaasi.



# Sidee bay EVV u shaqeysaa?

PSW waxay isticmaali doonaan qalabkooda gacanta 'mobile device' *(telefoonka casriga ah 'smartphone' iyo tablet-ka)* si ay ula socdaan waqtiga ay shaqeeyeen ...

... waqtiga aad
<u>BILAWDO</u> & <u>DHAMMEYSO</u> shaqada

adiga oo gelaya eXPRS oo isticmaalaya halka internet-ka laga gelo 'internet browser' *(sida Safari, Edge, Chrome, iwm.)*.

➡ *EVV <u>ma aha</u> nidaamka 'app' aad soo dejiso/min-guuriso.*



# Sidee bay EVV u shaqeysaa?

Meesha internet-ka laga gelo ‘browser’ dhexdeeda, ku qor cinwaanka website-ka eXPRS:

https://apps.state.or.us/exprsWeb/

✓ Pro Tip: Website-ka eXPRS ku keydso ‘save’ meesha aad wax gashato ‘Bookmarks ’ama Favorites si aad si dhaqso ah ugu dooran karto marka xiga ee aad u baahato in aad isticmaasho eXPRS Mobile-EVV.



# Sidee bay EVV u shaqeysaa?
## BILAWGA WAQTIGA SHAQO

Marka aad ku jirto website-ka eXPRS ee aad kaga jirto qalabkaaga gacanta 'mobile device', geli Magaca Lagu Gelo "Login Name" & Password-ka laguu qoondeeyay ee loogu talagalay eXPRS.

Taabo GUDBI SUBMIT si aad u gasho.



# Sidee bay EVV u shaqeysaa?
## BILAWGA WAQTIGA SHAQO

Mar kasta oo aad gasho eXPRS Mobile-EVV waxaad arki doontaa farriimo muhiim ah.

*Tusaale:*

- ✓ *taariikhda dhicida waqtiga aqoonsiyadaada PSW (tusaalaha A),*
- ✓ *ogeysiinta dhicida waqtiga mid ka mid ah ama ka badan oo ah oggolaanshahaaga (tusaale B)*

Taabo badhanka Aqoonta **Acknowledge** si aad u sii wado.



# Sidee bay EVV u shaqeysaa?
## BILAWGA WAQTIGA SHAQO

Marka la aad gasho ...

➡ TALLAABADA 1: dooro *ADEEGA* aad bilaabayso in aad ka shaqeyso.

*Xusuusnow...*

*KALIYA oggolaanshaaga shaqeynaya ee loogu talagalay taariikhda aad shaqeynayso ayaa halkan la isku tusayaa/muujinayaa.*



# Sidee bay EVV u shaqeysaa?

## BILAWGA WAQTIGA SHAQO

Taabo Adeega *"Service"* aad bilaabayso waqtigiisa shaqo.

Badhanka adeega la doortay wuxuu isku beddeli doonaa madow marka la doorto.

*Waxaad dooran kartaa kaliya 1 adeeg waqtigiiba.*



# Sidee bay EVV u shaqeysaa?
## BILAWGA WAQTIGA SHAQO

Marka adeega ay tahay in aad shaqeyso la doorto,

taabo badhanka cagaaran ee Sii wad Continue.



# Sidee bay EVV u shaqeysaa?

## BILAWGA WAQTIGA SHAQO

- TALLAABADA 2: Dooro QOFKA(DADKA) aad u bilaabayso adeega shaqo.

*XUSUUSNOW...*

*waxaad KALIYA arki doonaa dadka haysta oggolaansho shaqeynaya oo loogu talagalay adeegyada aad bixin doonto.*



# Sidee bay EVV u shaqeysaa?
## BILAWGA WAQTIGA SHAQO

Taabo magaca *Qofka(dadka)* korkiisa si aad u bilawdo waqtiga shaqo ee bixinta adeega la doortay.

✓ *Haddii aan la shaqeynayso in ka badan 1 qof oo loogu talagalay adeegaasi, taabo dhammaan dadka kooxda ka tirsan ee aad la shaqeyn doonto.*



# Sidee bay EVV u shaqeysaa?

## BILAWGA WAQTIGA SHAQO

Marka aad taabato magaca qofka(dadka) , badhanka loogu talagalay iyagu wuxuu isku beddeli doonaa madow.

Taabo badhanka cagaaran ee Sii wad Continue si aad ugu gudubto shaashada xigta.



# Sidee bay EVV u shaqeysaa?
## BILAWGA WAQTIGA SHAQO

➡ TALLAABADA 3: Xaqiiji adeegyada & qofka loogu talagalay waqtiga shaqo ee aad bilaabayso.

Taabo badhanka cagaaran ee BILAW SHAQADA BEGIN WORK si aad waqtigaaga shaqada uga bilawdo *eXPRS Mobile-EVV*.



# Sidee bay EVV u shaqeysaa?
## BILAWGA WAQTIGA SHAQO

- TALLAABADA 4: *Haddii qalabka aad isticmaalayso kaa codsado*, riix OK si aad u xaqiijiso Goobta halka aad ka bilaabayso shaqadaada.

Adeegyada goobta waa in la dhigaa mid DAARAN/FURAN "ON"
oo loogu talagalay qalabka aad isticmaali doonto *IYO* internet-ka laga gelo 'browser'.

*eXPRS Mobile-EVV* ayaa qabata/keydisaa 'captures' sawirka/muuqaalka waqtiga saxda ah 'point-in-time' ee halka aad joogtid waqtiga aad BILAWDO & DHAMMEYSO waqtigaaga shaqada oo KALIYA.

*Tani waa mid uu sharciga federaalku uga baahan yahay EVV.*

EVV *ulama* socoto si joogta ah halka aad tegto inta lagu jiro ama waqtigaaga shaqo ka dib.



# Sidee bay EVV u shaqeysaa?

## BILAWGA WAQTIGA SHAQO

Haddii aadan haysan adeegyadda goobta si sax ah loogu rakibay labada qalab iyo Ikhtiyaarka webka, waxaad heli doontaa farriin qalad ah oo laga helo eXPRS.

Iska hubi goobahaaga Goobta, kadibna soo noqo oo sii wad "saacad gudahood".



# Sidee bay EVV u shaqeysaa?

## BILAWGA WAQTIGA SHAQO

Marka aad si guuleysi ah u bilowday Shiftadaada (aka: "saacad"), eXPRS waxay tan ku xaqiijin doontaa calaamada cagaaran.

Fadlan ku laabo Dashboard - Return to Dashboard.



# Sidee bay EVV u shaqeysaa?
## BILAWGA WAQTIGA SHAQO

Marka aad bilawdo waqtigaaga shaqada, *eXPRS Mobile-EVV* waxay ku geyn doontaa/gudbin doontaa shaashada macluumaadka laga helo ‘**dashboard**’.

Meesha macluumaadka laga helo ‘**dashboard**’ waxay tusi/muujin doontaa:

- ✓ *Cidda aad la shaqeynayso,*
- ✓ *Adeega aad bixinayso, iyo*
- ✓ *Waqtiga Bilawga & Taariikhda waqtigaasi shaqada ee loogu talagalay qofka.*



# Sidee bay EVV u shaqeysaa?
## BILAWGA WAQTIGA SHAQO

Marka uu waqtigaaga shaqada ee EVV bilaabmo, waad ka bixi kartaa *eXPRS Mobile-EVV*.

Taabo Astaanta Liiska "Menu Icon" korkeeda ee 3 khad/sadar leh ee ku taala dhinaca sare ee midigta xigta ee shaashada si aad uga shaqeysiiso liiska 'menu'.



# Sidee bay EVV u shaqeysaa?

## BILAWGA WAQTIGA SHAQO

Taabo ka bax "Logout" korkeeda si aad uga baxdo *eXPRS Mobile-EVV.*

Waqtigaaga shaqadu wuu ka sii socon doonaa website-ka eXPRS.

Shaqee waqtigaaga shaqada.



## Sidee bay EVV u shaqeysaa?

## DHAMMAADKA WAQTIGA SHAQADA

Marka aad dhammeyso shaqeynta waqtigaaga shaqo, mar kale isticmaal qalabkaaga gacanta ‘mobile device’ si aad u Joojiso Waqtigaaga Shaqada *(shaqada uga baxdo “clock out”)*.

Fur halka aad internet-ka ka gasho ‘internet browser’ & booqo website-ka eXPRS, sidii aad samaysay bilawgii waqtigaaga shaqada.



# Sidee bay EVV u shaqeysaa?

## DHAMMAADKA WAQTIGA SHAQADA

Gali eXPRS caadiga ahaa ee Magaca Lagu Gelo “Login Name” & Password-ka.

Taabo GUDBI SUBMIT si aad u gasho.



# Sidee bay EVV u shaqeysaa?

## DHAMMAADKA WAQTIGA SHAQADA

Mar kale, waxaad arki doontaa farriimo muhiim ah.

*<u>Tusaale</u>:*

- ✓ *taariikhda dhicida waqtiga aqoonsiyadaada PSW (tusaalaha A),*
- ✓ *ogeysiinta dhicida waqtiga mid ka mid ah ama ka badan oo ah oggolaanshahaaga (tusaale B)*

Taabo badhanka Aqoonta **Acknowledge** si aad u sii wado.



Sidee bay EVV u shaqeysaa?

## DHAMMAADKA WAQTIGA SHAQADA

Marka aad si guul leh u gasho, waxaad arki doontaa meeshaada macluumaadka laga helo 'Dashboard' oo leh waqtiga(yada) shaqada ee furan ee aad hadda shaqaynayso.

➡ TALLAABADA 1: Taabo badhanka guduudan ee JOOJI SHAQADA END WORK korkiisa si aad u Joojiso Waqtiga Shaqada.



Sidee bay EVV u shaqeysaa?

## DHAMMAADKA WAQTIGA SHAQADA

- TALLAABADA 2: Taabo magaca si aad u doorato Qofka(dadka) aad Joojinayso Waqtigooda shaqada.



# Sidee bay EVV u shaqeysaa?

## DHAMMAADKA WAQTIGA SHAQADA

Magaca qofka(dadka) la doortay waxay isku beddeli doonaan madow.

Taabo badhanka cagaaran ee Sii wad Continue si aad ugu gudubto shaashada xigta



# Sidee bay EVV u shaqeysaa?

## DHAMMAADKA WAQTIGA SHAQADA

Shaashada xaqiijinta ayaa tusi/muujin doonta Qofka & Adeega aad Joojinayso Waqtigooda shaqada.

➡ TALLAABADA 3: Taabo badhanka cagaaran ee HAA YES ee ku yaala xagga hoose ee shaashada si aad u Joojiso waqtigaaga shaqada & shaqada uga baxdo “clock out”.



# Sidee bay EVV u shaqeysaa?

## DHAMMAADKA WAQTIGA SHAQADA

➡ TALLAABADA 4: Mar kale, ***haddii qalabka aad isticmaalayso kaa codsado***, riix OK si aad u xaqiijiso Goobta halka aad ka joojinayso waqtiga shaqadaada.

*eXPRS Mobile-EVV* ayaa qabata/keydisaa 'captures' sawirka/muuqaalka waqtiga saxda ah '**point-in-time**' ee halka aad joogtid waqtiga aad BILAWDO & DHAMMEYSO waqtigaaga shaqada oo **KALIYA**.

*Tani waa mid uu sharciga federaalku uga baahan yahay EVV.*

EVV *ulama* socoto si joogta ah halka aad tegto inta lagu jiro ama waqtigaaga shaqo ka dib.



# Sidee bay EVV u shaqeysaa?

## DHAMMAADKA WAQTIGA SHAQADA

Markaad si guul leh u dhammaato Shiftadaada (aka: "saacad"), eXPRS waxay xaqiijin doontaa tan calaamada cagaaran ee weyn.

Taabo Done.



# Sidee bay EVV u shaqeysaa?

## DHAMMAADKA WAQTIGA SHAQADA

Waqtigaaga shaqadu(ooyinku) hadda ayuu Dhammaaday & *qoraalkii* macluumaadka biilka SD si toos ah ayaa loogu keydiyay 'saved' website-ka eXPRS Desktop.

Waxaad hadda dooran kartaa adeeg si aad u

*Bilawdo Waqti Shaqo oo Cusub*,

*AMA …*

*Ka bax eXPRS Mobile-EVV.*



# Sidee bay EVV u shaqeysaa?
# SIXITAANADA, ISBEDDELADA & CUSBOONEYSIINTA

- Biilasha SD ee la geliyo ee laga sameeyo *eXPRS Mobile-EVV* waxaa loo keydiyaa 'saved' *qoraal* ahaan gelinta website-ka eXPRS Desktop.

- PSW waxay sixitaano, isbeddelo ama cusbooneysiin ku samayn karaan *qoraalka* biilka EVV SD ee la geliyo ee ay abuurtay/samaysay *eXPRS Mobile-EVV*, haddii loo baahdo.

# Sidee bay EVV u shaqeysaa?
## SIXITAANADA, ISBEDDELADA & CUSBOONEYSIINTA

Si loo saxo, beddelo, cusbooneysiiyo iyo/ama loo gudbiyo *qoraalkaaga* biilka EVV SD ee la gelinayo,

Waxaad gashaa *eXPRS Desktop* (website-ka caadiga ah ee eXPRS).



# Sidee bay EVV u shaqeysaa?

## SIXITAANADA, ISBEDDELADA & CUSBOONEYSIINTA

Riix halka ay ku qoran tahay Samee Gelinta Adeegyada La bixiyay ee ka socda Oggolaanshaha Adeega ee Hal mar *"Create Service Delivered Entries from Single Service Authorization"* si aad u gaarto boggaga biilka ee oggolaanshahaaga.



# Sidee bay EVV u shaqeysaa?

## SIXITAANADA, ISBEDDELADA & CUSBOONEYSIINTA

Ka dib raadinta oggolaanshahaaga, riix astaanta lacagta ee cagaaran $ korkeeda ee dhinaca shishe si aad u furto bogga oggolaanshaha biilka.



# Sidee bay EVV u shaqeysaa?

## SIXITAANADA, ISBEDDELADA & CUSBOONEYSIINTA

Bogga biilka dhexdiisa, waxaad arki doontaa biilashaada EVV SD + Sababta Isbeddelka *“Change Reason”* oo ku jirta liisaska meesha hoos loo sii gelayo ‘dropdown’. Biilasha SD waxay noqon doonaan xaalad *goraal* ahaan & taariikhduna ama furnaan doonto in la beddelo.



# Sidee bay EVV u shaqeysaa?

## SIXITAANADA, ISBEDDELADA & CUSBOONEYSIINTA

Isbeddelada ama cusbooneysiinta lagu samaynayo qoraalka biila shaEVV SD waxaa la samayn karaa & keydin ‘saved’ karaa ka hor inta aan la gudbin. Xaqiiji in aad Sababta Isbeddelka “Change Reason” ka soo doorato meesha hoos loo sii gelayo ‘dropdown’ si aad u sharaxdo isbeddelaada.



# Sidee bay EVV u shaqeysaa?

## SIXITAANADA, ISBEDDELADA & CUSBOONEYSIINTA

Biilasha SD ee loogu talagalay EVV ayaa sidoo kale gacan ahaan loo gelin karaa 'manually', haddii loo baahdo. Mar kale, xaqiiji in aad Sababta Isbeddelka "Change Reason" ka soo doorato meesha hoos loo sii gelayo' dropdown' taasi oo loogu talagalay sababta aad ugu baahan tahay in aad gacan ahaan u geliso 'manually'.



# Sidee bay EVV u shaqeysaa?

## SIXITAANADA, ISBEDDELADA & CUSBOONEYSIINTA

Haddii aad u baahan tahay in aad *gacan ahaan 'manually' u samayso* ama *isbeddelo ku samayso* biilka SD ee la geliyo ee lagu keydiyay 'saved' eXPRS Mobile-EVV, xaqiiji in aad sababta loo sameeyay ka soo doorato meelaha hoos loo sii gelayo 'dropdowns'.






# Sidee bay EVV u shaqeysaa?
# XAASHIYAHA SHAQADA

## Waxyaabo muhiim ah oo ay in la xasuusnaado:

1. Ma *jiro isbeddel* ku imaanaya nidaamka biilka SD ee loogu talagalay *adeegyada aan ahayn EVV*:
   - OR004 - Masaafada La Socdo
   - OR401 - Tababarka Shaqada

2. Ma *jiro isbeddel* ku imaanaya nidaamka biilka SD ee loogu talagalay *nidaamka xaashida shaqada*:
   *PSW waa in ay weli isticmaalaan eXPRS Desktop (website-ka caadiga ah) si ay u:*
   - ✓ gudbiyaan *DHAMMAAN* biilka SD ee waqtiga ay shaqeeyeen ee loogu talagalay bixinta lacagta
   - ✓ daacabaan xaashiyaha shaqada
   - ✓ helaan saxiixyada cidda loo shaqeeyo oo ku yaala xaashiyaha shaqada
   - ✓ xaashiyada shaqada u keenaan CME

# Sidee bay EVV u shaqeysaa?

## XAASHIYAHA SHAQADA

Waqtiga mushaharka, Dooro & Gudbi *qoraalkaaga* biilasha SD, sida aad had iyo jeer samayso.


SE49/OR526 - Attendan... home or comm/NA - ...

**Rate:** $14.65 | **Review Req:** Yes

Print

| Select | Date | Start Time (HH:MM AM/PM) | End Time (HH:MM AM/PM) | Total Service Time | Billed Units | Group | Status | Start Time Change Reason | End Time Change Reason | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| ☑ | 3/13/2019 | 12:15 PM | 2:45 PM | 2:30 | | ☑ | Draft | Clocked in too early | Reason | |
| ☑ | 3/14/2019 | 12:52 PM | 4:00 PM | 3:08 | | ☑ | Draft | Reason | No internet service to | |
| ☑ | 3/25/2019 | 9:11 AM | 11:30 AM | 2:19 | | ☑ | Draft | Reason | Reason | |
| ☑ | 3/26/2019 | 8:45 AM | 9:15 AM | 0:30 | | ☐ | Draft | No Internet service to | | |
| ☐ | | | | | | ☐ | Draft | Reason | | Save All |
| | | | | 8:27 | | | | | | |

Cancel Changes

For items checked abov Submit Delete

# Sidee bay EVV u shaqeysaa?

## XAASHIYAHA SHAQADA

Biilasha SD ee leh xaalad *hawsheeda hadda lagu jiro* waxaa lagu daabici doonaa xaashiyaha shaqada si ay cidda loo shaqeeyo u saxiixdo & gudbiso CME.



**Service:** SE49/OR526 - Attendant Care, home or comm/NA - Not Applicable

**Rate:** $14.65 **Review Req:** Yes

Print

| Select | Date | Start Time (HH:MM AM/PM) | End Time (HH:MM AM/PM) | Total Service Time | Billed Units | Group | Status | Start Time Change Reason | End Time Change Reason | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| ☐ | 3/13/2019 | 12:15 PM | 02:45 PM | 2:30 | 2:30 | Yes | Pending | Clocked in too early | | |
| ☐ | 3/14/2019 | 12:52 PM | 04:00 PM | 3:08 | 3:08 | Yes | Pending | | No internet service to clock out | |
| ☐ | 3/25/2019 | 09:11 AM | 11:30 AM | 2:19 | 2:19 | Yes | Pending | | | |
| ☐ | 3/26/2019 | 08:45 AM | 09:15 AM | 0:30 | | No | Pending | No Internet service to clock in | | |
| ☐ | | | | | | ☐ | Draft | Reason | | Save All |
| | | | | 8:27 | | | Cancel Changes | | | |

# Sidee bay EVV u shaqeysaa - SU'AALAHA??

Xaqiiji in aad dib u eegto su'aalaha & jawaabaha ka socda dokumentiga ee **Su'aalaha Inta Badan La Isweydiiyo (FAQ) Tababarka PSW EVV** document.



Oregon Department of Human Services
Express Payment & Reporting System (eXPRS)

eXPRS
Express Payment & Reporting System

PSW Electronic Visit Verification (EVV)

**Frequently Asked Questions** (FAQs)

(v9; 4/21/2019)

Below are some questions & answers for PSWs on the implementation of EVV & using **eXPRS Mobile-EVV**.

---

**Q: What is EVV?**

**A:** Electronic Visit Verification (or EVV) is part of a federal law that was passed by Congress in 2016. It requires states to verify the delivery of Medicaid funded Attendant or Personal Care services in real time (meaning at the time the service is occurring) from providers. The EVV time capture feature in eXPRS will save PSWs time by reducing the amount of work PSWs must do to enter Service Delivered (SD) billings in eXPRS manually. eXPRS' EVV method will capt[...] all the billing data required & save it in eXPRS automatically.

**Q: What is "eXPRS Desktop"?**

**A:** eXPRS Desktop is what we call the regular eXPRS webs[...] now to log in & view all their eXPRS related informati[...] their SD billing & travel time data. eXPRS Desktop is be[...] regular desktop or laptop computer.

# Tilmaamaha Ilaha & Taageerada EVV

Waxaa jira tilmaamo dhanka taageerada oo tallaabo-tallaabo ah oo la helayo si ay kaaga caawiyaan isticmaalka *eXPRS Mobile-EVV*.

- ✓ *Guudmarka Macluumaadka ee EVV*
- ✓ *Galida EVV & Hagida*
- ✓ *Sida loo Bilaabo Waqtiga Shaqo*
- ✓ *Sida loo Joojiyo Waqti Shaqo*
- ✓ *Sida loogu Daro Waqti Shaqo (oo loogu talagalay adeegyada koox ahaaneed)*
- ✓ *Sida loo Saxo Biilasha EVV*



# SU'AALAHA kale ee EVV??

Haddii aad hayso su'aalo kale oo ku saabsan Hirgelinta EVV, fadlan email iyada u dir:

ODDS.EVV@state.or.us



# Waad mahadsan tahay in aad Nagala Soo Qayb gasho Maanta!

